COVID-19 (karoonafayras) iyo Kabka Caymiska Shaqo-La'aanta ee Shaqaaleysiiyayaasha

Su'aalo iyo Jawaabo

Su'aasha 1: Waxa laga yaabaa in aan waajahno xidhnaan shaqo joojin iyadoo laga jawaabayo karoonafayras. Maxaan u baahanahay in aan tixgalino?
Jawaabo: Hadii ganacsigaagu uu waajaho fasax wayn ama xidhitaan, Shaqaalaha Mashruuca Qaybta Horumarinta Shaqaalaha ee Lowa waxay kaa caawin karaan waxa ku adkaan doona ee nidaamka shirkadaada iyo wakhtiyada ku adag shaqaalahaaga. Kooxdayada Jawaabaha Degdega ahi waxay kaa caawin karaa in ay hubiyaan u hogaansamida shuruucda Fadaraalka ee ku aadan fasaxyada waaweyn, waxaana ay siin karaan shaqaalahaaga adeegyo kala duwan.

Su'aasha 2: Waxaynu u baahan karnaa in aan yarayno saacadaha shaqada; waa maxay kala dooroshooyinka aan haysano?
Jawaab: Shaqaalaysiiyaashu haday waajahaan hoos u dhac xaga ganacsigooda ah ama adeegyada oo ay ugu wacan tahay saamaynta dhaqaale ee caabuqa COVID-19 waxay codsan karaan Mashruuca Mudawacnimada Wadaaga Shaqo. Mashruucan wuxuu u ogolaanayaa Shaqaalaysiiyaashu in ay raadiyaan nidaam kale oo shaqo ka joojin ah— in ay sii haystaan shaqaalahooda tababaran iyagoo dhimaya saacadaha shaqada iyo mushaharkooda kaas oo qayb ahaan hoos u dhigi kara kabka caymiska shaqo la'aanta. Booqo https://www.iowaworkforcedevelopment.gov/voluntary-shared-work-frequently-asked-qu estions Si aad waxbadan uga ogaato faa'idooyinkiisa shaqaalaha iyo loo shaqeeyayaayasha, iyo sida loo codsado. Shaqaalaysiiyaasha ku jira qorshaha Shaqada la Wadaago ee Mutadawacnimada ah lagama qaadi doono lacagta kabka. Hadii aad yarayso saacadaha shaqo ama shaqo ka joojinta ku meelgaadhka ah, shaqaaluhu waxay heli doonaan qayb ama dhamaan kabka caymiska shaqo la'aanta.

Su'aasha 3: Hadii shaqaale helo kab shaqo la'aanta oo uu sababay xidhitaanka ganacsiyada ee COVID-19, miyay kordhaysaa cashuurta shaqo la'aanta shaqaalaysiiyuhu?
Jawaab: Dhamaan cabashooyinka shaqo la'aaneed ee la soo gudbiyey ee uu sababay caabuqa COVID-19 shaqaalaha waa laga dhaafi doonaa khidmada ilaa mudo. Wakhti xaadirkan, IWD kama qaadi doonto wax khidmad ah loo shaqeeyaha ilaa iyosanduuqa caymiska shaqaale la'aanta ee Lowa uu hoos u dhaco ilaa $950 million. Wakhti xaadirkan, IWD waxay bilaabi doontaa in ay khidmad ka qaado shaqaalaysiiyaha si loo ilaaliyo sumcada Sanduuqa Lacagta. IWD waxay kaga dhawaaqi doontaa marka ay tani dhacdo wabsaaydkeeda.

Su'aasha 4: Hadii ay shaqaaluhu helaan kabka fidsan ee shaqo la'aanta ee heer fadaraal taas oo uu sababay xidhitaanka ganacsiyada ee caabuqa COVID-19, miyuu shaqaalaysiiyaha laga qaadi doonaa kabkaasi?
Jawaab: Maya. Waxa kab ah oo ka baxsan inta caadiga ah ee caymiska kabka shaqo la'aanta ee lowa kaas oo laga heli karo lowa wax khidmad ah lagama qaaidi doono shaqaalaysiiyahay.

Su'aasha5: Miyuu shaqaalaysiiyuhu u baahan karaa in shaqaaluhu joogaan guriga mudada soo ifbaxa astaamaha COVID-19?
Jawaab: Haa. shaqaalaysiiyahaagu wuxuu kaaga baahan karaa inaad joogtid guriga ugu yaraan 14 cisho hadii aad u safartay dibada ama aad la xidhiidhay qof booqday gobol xanuunku ku faafay. Shaqaalaysiiyuhu waa in uu isku dayo in uu siiyo mushaharka fasaxa sida ku qeexan Xeerka Jawaabta Koobaad Coronavirus(FFCRA). Sidoo kale waxaad galin kartaa shaqaalaha shaqo joojin ku meel gaadha shaqaalahaaguna waxay ku haboonaan doonaan kabka caymiska shaqo la'aanta.

Su'aasha 6: Hadii aan haysto 25 shaqaale oo aan u baahdo xidhis ku meel gaadh ah,

miyaan u baahanahay inaan u diro ogeysiis DIGNIIN ah?
Jawaab: Maya. Kaliya shaqaalaysiiyuhu wuxuu ubaahan yahay inuu u diro ogeysiis DIGNII ah hadii uu rabo inuu si rasmiya u xidho. Shaqo ka joojinta ku meel gaadhka ah, ogaysiis DIGNIIN ma qabanaayo.

Su'aasha 7: Miyaan u baahanahay in aan bixiyo lacagta fasaxa hadii aanay shaqaalahaygu awood u lahayn in shaqeeyaan caabuqa COVID-19 awgii?
Jawaab: Laga yaaba. Fadlan dib u eeg waajibaadkaaga sharci ee FFCRA iyo dhacdooyinka keenaya si deg deg ah in loo qabto.

Suu'asha 8: IWD waxay dhawaan soosaartay siyaasad taas oo aan u baahnayn shaqaalahu in ay isticmaalan PTO,fasaxa, fasaxa xanuunka ka hor inta aanay bixin kabka, tan micnaheedu waa maxay marka laga eegayo xaga shaqaalaysiiyaha?
Jawaab: Waxba. IWD waxay u samaysay go'aan siyaasadeed ku haboonaanshaha kabka. Shaqaalaysiiyuhu wuxuu dooran karaa inuu sameeyo siyaasadiisa gaarka ah kaas oo ay tahay in shaqaaluhuna u isticmaalo lacagta fasaxa ka hor inta aan shaqaalaha la galin shaqo ka joojin ku meel gaadha.

Su'aasha 9: Shaqaaalaysiiye ahaan, Wali ma hirgalin karaa oo ma ka rajayn karaa shaqaalahayga in adeecaan qawaaniinta sharci, nidaamyada, iyo tilmaamaha?
Jawaab: Haa. Xaaladan hada ee COVID-19 may badalin waajibaadka shaqaalaha, iyo awoodaha shaqaalaysiiyaha ee inuu u amro shaqaalhiisa.

Su'aasha 10: Ma jiraan shuruudo cusub oo aan u baahanahay inaan dib u eego shaqaaleysiiye ahaan, maxaana waajib sharciya ee aan leeyahay inta lagu jiro xaaladan?
Jawaab: Haa. Koongaras-ka ayaa meel mariyay FFCRA, iyo Caawimada Coronavirus, Caawimo, iyo Xeerka Ilaalinta dhaqaale (CARES) . Fadlan kala tasho sharci yaqaankaaga ama Waaxda Shaqaalaha waajibaadkaaga labadan Xeer. Fadlan dib u eeg Wararka boga waaxda horumarinta shaqaalaha ee lowa ee khuseeya isbadalada kabka caymiska shaqo la'aanta marka ay dhacayaan.

Su'aasha 11: Miyay cabsida ama sabab aan la qorin ku filantahay shaqaaluhu in aanu iman shaqada?
Jawaab: Maya. Fadlan dib u eeg shuruudaha keenaya FFCRA iyo xeerka CARES.

Su'aasha 12: Shaqaalahayga, kaas oo aan ku jirin xaalad caafimaad, ayaa kusoo noqday shaqada soona sheegay in uu dareemayo badqab. May joojin karaan oo heli karaan kabka shaqaale la'aanta?
Jawaab: Hadii aad qaadayso talaabooyin aad ku abuurayso goob shaqo oo nabdoon, Tusaale in aad siiso goobo maydhasho oo dheeraad ah, nadaafad dheeraad ah, PPE sida maaskaro iyo galoofis, ama talooyinka kala fogaanshaha bulshada, shaqaaluhu si sax ah uguma haboona kabka shaqaale la'aanta hadii ay doortaan in ay ka tagaan. Hadii aad diido in aad raacdid talooyinka badbaado iyo hagaha OSHA ee ay ku taliyeen dawlada Gobolka ama heer fadaraal ee shaqadaada, shaqaaluhu waxay awood u yeelan karaan in ay helaan kabka shaqo la'aanta. Si kastaba ha ahaatee, hadii shaqaaluhu ku haboon yahay kabka shaqo la'aantu waa xaqiiqo gaara waxaana loo go'aamin doonaa xaalad xaalad.

Su'aasha 13: Shaqaalahaygu wuxuu kusoo noqday shaqada waxaanu soo wariyey in aanu badqab dareemayn iyadoo ay ugu wacantahay xaalado caafimaad oo hore u jiray taas oo khatar weyn ku galinaysa
COVID-19. Miyey joojin karaan oo heli karaan kabka shaqada?
Jawaab: Waxaad ka codsankartaa shaqaalaha in ku siiyaan xog ay ka heleen dhakhtarkooda adiga oo uga codsanaya si tixgalin leh. Hadii aad u dafirto si ku talo gal ah shaqaalahaaga heshiis suuro oo uu siiyay dhakhtarkoodu iyada oo ay ugu wacantahay xaalad caafimaad oo hore u jirtay, ama aanad awood u lahayn in aad siiso deegaan shaqo oo bad qaba(sida in ay kuu shaqeeyaan iyaga oo jooga guryahooga) waxay si saxa ugu haboonaan karaan in ay helaan kabka shaqo la'aanta hadii ay doortaan in shaqada tagaan

ama aad u diido in fasax ahaadan .

Su'aasha 14: Miyay shaqaalahaygu go'aansan karan in ay si iskood ah aanay ugu soo noqon shaqada, ama ay ku soo noqdaan marka la amro?
Jawaab: Shaqaaluhu ma dooran karaa in aanu iman shaqada, ama aanu kusoo noqon shaqada, tan waxa loo tixgalin doonaa joojin mutadawacninimo ah, shaqo ka tagid, ama diidid in shaqada lagu soo noqdo. Kuwan oo dhami waxay ka joojin doonaan kabka caymiska shaqo la'aanta ee gobolka. Haday tani dhacdo, shaqaalysiiyaashu waxay ka jawaabi doonaan ogaysiiska cabashada markay helaan marka dacwada shaqaalaha ee kabka caymiska shaqaale la'aanta ama waxay ka diwaan galin karaan IWD adiga linkigan https://uiclaims.iwd.iowa.gov/EmployerSeparation/.

Hadii shaqaaluhu aanu ku haboonayn in uu helo kabka shaqo la'aanta ee gobolka, waxay codsan karaan Caawimada Shaqo la'aanta ee xanuunka (PUA). Qaar ka mid ah sababaha shaqaalaha u diidi karo shaqada ee keeni kara ku habooananshaha kabka shaqo la'aanta ee PUA laakiin aan lagu xadidin:

1. Waxa laga baadhay COVID-19 ama waxa ka muuqda astaamaha.

2. Xubin ka mid ah qoyskooda ayaa laga helay COVID-19.
3. Waxay daryeelayaan xubin ka mid ah qoyskooda oo laga helay COVID-19.
4. Iyaga, ama xubin ka tirsan qoyskooda, ayaa kusugan qeybaha halista ah waxaana lagula taliyay in ay gasho xaalad karantiil iskii ah iyada oo laga cabsi qabo walaac la xidhiidha caabuqa COVID-19.
5. Ma haystaan daryeel caafimaad oo caruurta ah oo la xidhiidha caabuqa COVID-19.
6. Ma gaadhi karaan goobta shaqada iyadoo ay ugu wacantahay karantimaynta caabuqa COVID-19.
7. Waxay qabeen COVID-19 waanay ka bogsadeen, laakiin wuxu ku sababay samayn caqabado oo aanay awoodin in ay qabtaan shaqooyinka asaasiga ah.

Hadaba, hadii shaqaaluhu buuxiyaan shuruudaha, waxay diidi karaan in ay ku noqdaan shaqada lakiin waxay qaadan doonaan kabka shaqo la'aanta ee heer fadaraal. Shaqaalaysiiyayashu waa in si dhaw ula shaqeeyaan shaqaalaha si ay uga gudbaan cabaqad kasta oo soo waajahda marka ay shaqada ku noqonayaan.

Su'aasha 15: Shaqaalahaygu waxay ka qaadan karaan lacag badan kabka caymiska shaqo la'aanta in ka badan intay shaqeyn lahaayeen. Miyay ka tagi karaan shaqo anoo wali haya shaqo diyaara?
Jawaab: Maya. Waa in ay si kumeel gaadha ah shaqada looga joojiyaa, ama la yareeyey saacadaha shaqada si ay ugu haboonaadaan kabka. Hadii shaqaaluhu ka tago si uu u helo kab, tani waxay keeni kartaa joojin waxaana loo tixgalin doonaa wax isdaba marin. Hadii shaqaaluhu uga tago shaqada ujeeda isaga u gaar ah oo ah in uu ururso kabka shaqo la'aanta, fadlan kusoo ogoysii IWD linkigan https://www.iowaworkforcedevelopment.gov/report-fraud.

Su'aasha 16: Miyay shaqalahaygu wali ku haboonyihiin in ay qaataan kabka caymiska shaqo la'aanta hadii kaliya aan shaqada ugusoo celin karo jadwalka yareeyey?
Jawaab: Laga yaaba. Iowa waxay kuu ogalaanaysa qayb ahaan kabka caymiska shaqo la'aanta. Shaqaaluhu waxay u baahanyihiin in soo wariyaan todobaad kasta marka ay samaynayaan codsashada kabkooda. Noocan dakhliga ah waxa ku jirta; mushaharka, mushaharka fasaxa, fasaxa xanuunka, mushaharka qofka joogtada ah, xaqul shaaha,nususaacaha, khidmada, iyo guno kasta oo kutagal ah iyo magdhaw kasta oo aan ahayn lacaga cadaan ah (Tusaale Qolka iyo boodhka, telefoonka gacanta). Waxay

qaadan karaan ilaa 25 boqolkiiba kabkooda todobaadlahaa ("WBA") ka hor kabka lacagta intaan la yareyn, lakiin wali waxaa jira shuruud inlasoo wariyo dakhliga xataa haduu ka hooseeyo boqolkiiba 25. Dakhliyada ka badan boqolkiiba 25 waxay yareyn doonaan kabka lacagtaada. Hadii aad ka heshid $15 ama in ka badan WBA, ma heli doonaan kabka lacagta todobaadkaasi. Tusaale:

MWBA-goodu waa $400 waxaanad helaysaa $370.

25% ka $400 waa $100. $100 lagama jarayo mushaharka tobaadlaha.

$370 - $100 = $270. Baaqiga $270 waxa laga jarayaa WBA.

$400 - $270 = $130.

$130 waa xadiga lacagta ee todobaadka.

Su'aasha 17: Sidee ayaa IWD in ay u ogaan doontaa in shaqaaluhu soo wariyeen mushaharkooduu saxda ahaa? **Jawaab:** Cabasho kasta Waa in aad wargalisaa mushaharka la bixiyo ee la siiyo shaqaale kasta sadex biloodba. IWD waxay leedahay barnaamijk koomiyuutar isbarbardhigaaya mushaharka lasiiyey iyo mushaharka lasoo wariyey marka codsiga lasameeyey Hadii IWD ay go'aamiso in shaqaale si wax isdabamarin leh u soo wariyay mushaharkiisa, waxa laga jari doonaa kabkiisa 15% oo ganaax ah, mustaqbalkana ma heli doono wax kab ah, waxaanu lagu oogi doonaa xeer ciqaabeed.

Su'aaha 18: Hadii shaqaluhu isticmaalo PTO, Fasaxa caadiga ah, fasaxa xanuunka, miyay tani saamaynasaa kabka caymiska shaqo la'aanta
Jawaab: Haa. Isku badalkasta oo mushahar wuxuuu u baahanyahay in shaqaaluhu kasoo warbixiyaan, waxaana laga jari doonaa kabkooda caymiska shaqaale la'aanta. Fadlan u tixraac su'asha 16.

Maxaan sameeyaa hadii aan qabo su'aalo dheeraad ah?

Hadii aad hayso su'aalo dheeraad ah, fadlan kala xidhiidhaa Waaxda Horumarinta Shaqaalaha ee Iowa
1-866-239-0843. Buuga gacanta ee loo shaqeeyaha caymiska shaqaale la'aanta ee Iowa waxa laga heli karaa halkan: https://www.iowaworkforcedevelopment.gov/employer-handbook. Waaxda Horumarinta Shaqaalaha ee Iowa ma awoodi doonto in ay ku siiso arimo khuseeya sharci ama talada waaxda shaqaalaha. Fadlan la xidhiidh cida kuu matasha sharciga iyo shaqaalaha si aad u waydiiso su'aalo la xidhiidha.

Halkee ayaan ka raadin karaa su'aalo dheeraad ah oo la xidhiidha shaqaalaysiiyaha iyo ganacsiga oo ku saabsan COVID-19?
U.S. Waaxda Shaqaalaha: https://www.dol.gov/coronavirus

Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Iowa: https://idph.iowa.gov/Emerging-Health-Issues/Novel-Coronavirus

Xarunta Xakaymaynta Xanuunada: https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html

Xarunta Xakamaynta Xanuunada ee Ganacsiyada iyo Shaqaaleysiiyayaasha: https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/organizations/businesses-employers.html

Fiiro Gaara: Wakhti xaadirkan, IWD kama qaadayso wax lacag ah loo shaqeeyayaasha shaqaalahoodu kasoo cawdeen waxyaabo la xidhiidha COVID-19. Waxaan aas aasnay hadhaa loogu talagalay damaanada kabka caymiska shaqo la'aanta, waxay noqon doontaa daruuri in lagu bilaabo in laga qaado lacag loo shaqeeyaayasha akoonkooda

iyadoo la eegayo cabashada shaqaale la'aanta. Waxa aan aas aasnay ilaalin ah $950 iyo sanduuqa lacagta wakhti xaadirkan
$1.10B ama $180 million dollars oo ka badan ilaalada $950 million. Go'aankan waxa loo qaatay in lagu caawiyo soo kabashada iyadoo hoos loo dhigayo korodh kasta oo ah heerka cashuurta shaqaale la'aanta kaas oo ku salaysan qayb weyn ee sanduuqa lacagta. Xeerka CARES wuxuu qeexayaa in qof kasta oo qaata mushaharka todobaadlaha $600 lagamana bixin doono sanduuqa lacagta.

La Cusboonaysiiyay Abril 30, 2020